JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WAR-MURTIYEEDKA SHIR SANADEEDKA XEER ILAALIYEYAASHA SOOMAALIYEED 2022

المؤتمر السنوي للنيابة الصومالية

HAGIS HUFAN

9 - 10 Febaraayo.

Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa soo qaban qaabiyay, hirgeliyeyna Shir Sannadeedka 4aad ee Xeer Ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed, kana dhacay Hotel DECALE ee magaalada Muqdisho Soomaaliya, kaas oo socday muddo 2 maalmood ah 9-10 ka Feb 2022.

Shirkaan waxaa ka soo qeyb galay madax ka kala socday Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Xafiisyada Xeer Iaalineed ee DXF, Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, Safiirka Mareykanka ee Soomaaliya, Hay'addaha IDLO, EUCAP, INL, UNODC. Shirka waxaa furay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka.

Ujeedada shirka : ujeedooyinka shirka ayaa ahaa:

1. Soo bandhigista guulaha iyo caqabadaha heysta Xeer-ilaalinta dalka;
2. falanqeynta iyo jiheynta qorsheyaasha cusub ee Xeer-ilaalinta;
3. sare u qaadista xiriirka xafiisyada kala duwan ee Xeer-ilaalinta dalka; iyo
4. in la is weydaarsado aqoonta iyo waaya aragnimada Xeer-Ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed.

Qodobadda warmurtiyeedka kasoo baxay shir sannadeedka 4aad ee xeer-ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed

1. Ka qeyb galayaasha Shirku waxa ay mahad gaar ah u celiyeen dhammaan qaban qaabiyeyaasha shirka oo uu ugu horeeyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Xeer-ilaaliyeyaasha Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo hay'adaha ka qeyb qaatay taaba galidda shirkaan.

2. Ka qeybgalayaashu waxay isla garteen ahmiyadda uu leeyahay Xeer Hoosaadka Anshaxa XafiiskaXeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, ayna haboon tahay in laga hirgeliyo Dowladaha Xubnaha ka Federaalka.

3. Shirku waxa uu isla qaatay muhiimadda caddeymaha foransig sayniska ay u leeyihiin cadeynta dembiyada maxkamadaha hortooda.

4. In la xoojiyo tayada Sheybaarada wadanka ee hadda la heli karo heer federaal iyo heer dowlad goboleed, sidoo kale in masuuliyiinta ka howlgala sheybaaradaas ay noqdaan kuwo ku qalabeysan aqoonta loo baahanyahay iyo hufnaan si kalsoonida Sheybaarada loo adkeyo.

5. Shirku waxa uu bogaadinayaa howlaha socda ee lagu aasaasayo Machadka Foransigga Qaranka.

6. Shirku waxa uu hoosta ka xariiqay muhiimadda uu Machadka Tababarka garsoorku u leeyahay tayeynta iyo, kor u qaadista xirfadda xeer-ilaaliyeyaasha. Waxuu kaloo boqaadinayaa howlaha la xiriira daadejinta adeegga machadka ee Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka soomaaliya.

7. Shirku waxa uu bogaadinayaa howlaha lagu mideynayo Manhajka Tababarka xeer ilaalinta iyo dardargelinta Tababarkooda.

8. Shirku wuxuu bogaadinayaa kobaca xiriirka ka dhexeeya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Xafiisyada Xeer-ilaalinta dowladaha xubnaha ka ah Dowladda federaalka soomaaliya.

9. Wuxuu kaloo shirku bogaadinayaa wada shaqeynta joogtada ah iyo xiriirka adag ee ka dhexeeya xafiiska xeer-ilaaliyaha guud ee qaranka iyo hay'adaha Baarista dalka, wuxuuna boorinayaa in la joogteeyo kormeerka iyo wada shaqeynta u dhexeysa boliiska iyo xeer-ilaalinta.

10. Shirku waxa uu isla gartay muhiimadda uu u leeyahay nidaamka maamulka dacwadaha electronigga ah fududeynta, keydinta iyo xog is dhaafsiga ee hey'adaha garsoorka.

11. Shirku waxa uu gartay ahmiyadda uu leeyahay Xafiiska Diiwaanka Dembiyada wuxuuna boorinayaa howlaha socda ee la xiriira howlgelinta xafiiskaasi.

12. Shirku wuxuu hoosta ka xariiqay dhibaatooyinka maandooriyaha iyo tacadiga jinsiga ay ku hayaan bulshada Soomaaliyeed, wuxuuna soo jeedinayaa in shirka sanadka dambe la qaban doono hal kudheggiisa laga dhigo maandooriyaha iyo tacadiga jinsiga.

13. Shirku waxa uu ka walaacsanyahay miisaaniyad yaridda hey'adaha Garsoorka dalka gaar ahaan Xafiisyada Xeer-ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed heer federaal iyo heer Dowlad goboleed, waa uuna ku talinayaa in hay'adda fulinta ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed ay xil iska saaraan wax ka qabashada arrintaas.

14. Shir sannadeedka xeer-ilaaliyeyaasha soomaaliyeed waxa uu soo jeedinayaa in deg deg ah loo dhammeystiro Golaha Adeegga Garsoorka Dalka.

15. Gunnaanad, Shirku wuxuu aqoonsaday doorka Xafiiska Xeer-ilaalinta heer federal iyo heer Dowlad goboleed ku leeyihiin dowlad dhiska soomaaliyeed ayna lagama maarmaan tahay in la helo xeer-ilaaliyeyaal ku qalabeysan aqoon, daacadnimo, karti iyo hufnaan.

Dhamaad.

Allaa Mahad leh
Khamiis, 10 ka feb 2022